



k12.wa.us

Dalabka Cabashada Bulshada ee Waxbarashada Gaarka ah (Special Education Community Complaint, SECC)

(Isticmaal foomka si aad u xarayso [Nidaamka Socda](#))

Foomkan waa ikhtiyaar. Xafiiskeenu waxa uu u adeegsan doonaa macluumaadka si uu kuu siiyo nidaamka cabashada. Wixii macluumaad ah ee ku saabsan nidaamka Barnaamijka Waxbarashada Shakhsi Ahaaneed (Individualized Education Program, IEP) iyo xuquuqda ardayga/qoyska, eeg [Xafiiska Maamulaha Tilmaamaha Shacabka \(Office of Superintendent of Public Instruction, OSPI\)](#), [Websaytka Xalinta Muranka Waxbarashada](#).

<p>U dir: Dr. Tania May Assistant Superintendent OSPI, Special Education PO Box 47200 Olympia, WA 98504-7200</p> <p>Taariikhda La Diray: _____</p>	<p>Sidoo kale u dir: Macalinta waxbarashada gaarka ah ee degmo dugsiga; iyo/ama maamulaha degmo dugsiga. Macluumaad xidhiidhka degmo dugsiga waxaa laga heli karaa Hagaha Waxbarashada Gaarka ah.</p> <p>Nuqulka cabashada waxaa lagu bixin karaa iimeel, faakis, ama iyada oo daabacan. Hoos, fadlan waxa aad ku sheegtaa faahfaahinta soo socota: magaca degmo dugsiga; cinwaanka degmo dugsiga; sida nuqulka loo bixiyay; cida la siiyay nuqulka; iyo, nuqulka la bixiyay.</p> <p>_____</p> <p>_____</p> <p>_____</p> <p>Taariikhda La Diray: _____</p>
---	---

Qaybta I: Macluumaadka Ardayga

OSPI waxay ku dadaashaa inay ku darto oo ay ka shaqayso soo afjarida farqiga fursaha. Hadii aad si iskaa ah u bixiso macluumaadka ku saabsan xaalada laxaad la'aanta, qoomiyada, iyo jinsiga ilmahaaga, macluumaadka sirta ah waxaa kaliya loo adeegsadaa si loogu ogaato qaabka ay wax u socdaan ee guud ee gobolkeena iyo in la hormariyo tilmaamaha OSPI ee guud iyo nidaamka xalinta muranka. *Hadii cabashadaadu ay ku saabsan tahay wax ka badan hal arday, fadlan isticmaal bogan.*

Magaca Ardayga

Xaalada Laxaad La'aanta Ardayga

Fasalka, Qoomiyada/Isirka, Jinsiga (Ikhtiyaar)

Magaca Dugsiga

Qayba II: Macluumaadkaaga

Waxaan ahayn waalidka/koriyaha ardayga kor ku qoran (fadlan goobaab jawaabta munaasabka ah): Haa / Maya

Magaca

Iimeelka

Cinwaanka Jidka

Luuqada Kowaad

Magaalada/Gobolka/Sibka

Qoomiyad/Isir, Jinsi (Ikhtiyaar)

Taleefanka

Hadii aanad ahayn waalid/koriye, waa maxay xidhiidhka ardayga? _____

X _____
Saxeexaaga

Taariikhda



Qaybta III: Tilmaamaha Cabashada Bulshada ee Waxbarashada Gaarka ah

Wixii kaalmo buuxinta foomkan, ama dalabka qaab aad u geli karto oo dhaanta, fadlan kala xidhiidh Xafiiska Maamulka ee Tilmaamaha Shacabka, Waaxda Waxbarashada Gaarka ah, 360-725-6075 ama speced@k12.wa.us.

Waa inaad u dirtaa nuqul cabashadaada ah OSPI iyo dugsiga/hay'ada isla markaas. Waxa aad ka heli kartaa macluumaadka xidhiidhka dugsiga/hay'ada [Hagaha Waxbarashada Gaarka ah](#).

Cabashadaada waa inuu la socdaa saxeexaagu. Saxeexa ayay u baahan tahay Sharciga Waxbarashada Shakhsiga Laxaadka La' (Individuals with Disabilities Education Act, IDEA) iyo shuruucda waxbarashada gaarka ah ee Washington.

Tani may dhacday sanadkii lasoo dhaafay? OSPI waxay kaliya baadhi kartaa eedeeynta waxbarashada gaarka ah ee dhacday sanadkii lasoo dhaafay oo kaliya oo ka bilaabma taariikhda cabashadu ay nasoo gaadhay. Tusaale ahaan, hadii aad heshay cabasho Oktoobar 1, 2021, waxa aanu baadhi karnaa mudada laga bilaabo Oktoobar 2, 2020.

Tani may la xidhiidhaa wax kale oo aan ahayn adeegyada waxbarashada gaarka ah? Hadii ay cabashadaadu la xidhiidho takoor ama xuquuqda ardayga ee Qaybta 504 ee Sharciga Dib u Dejinta, fadlan kala xidhiidh Xafiiska Xuquuqda Madaniga ah 1-800-421-3481, ama Xafiiska Xuquuqda Madaniga ah iyo Sinaanta OSP 360-725-6162. Su'aalaha ku saabsan habdhaqanka xirfadeed waa in loo gudbiyaa Xafiiska Nidaamka Xirfadlaha (Office of Professional Practices, OPP) 360-725-6130.

Qaabilaada: Hadii aad u baahan tahay qaabilaad gaar ah marka aad buuxinayso foomkan ama inaad la xidhiidho kooxda xalinta khilaafka, fadlan la xidhiidh 360-725-6075 ama speced@k12.wa.us.

Macluumaadka lagu wadaagay baadhitaanka cabashadan: Shuruucda waxbarashada gaarka ah ee Washington waxay u baahan yihiin OSPI inay la wadaagto wixii waraaqo ah ee ay bixisay degmadu waalidka/cabashada iyo wixii macluumaad ah ee lala wadaagay waalidka/dacwoodaha degmada taas oo qayb ka ah baadhitaanka. Hadii cida cabanaysaa ayna ahayn waalidka/koriyaha ardayga cabanaya, OSPI waxay dalbanaynaa ogolaanshaha bixinta macluumaadka, oo uu saxeexo waalidku, kahor inta wixii macluumaadka sheegaya haybtaada ee ku saabsan ardayga aan la wadaagin. Wixii macluumaad ah ee ku saabsan nidaamka cabashada, eeg: [Guudmarka Nidaamka Cabashada](#).

Macluumaadka Deegaanka

OSPI waxay ku dadaashaa inay ku darto oo ay ka shaqayso soo afjarida farqiga fursaha. Hadii macluumaadka aad ku bixiso si ikhtiyaarkaaga ah ku saabsan xaalada laxaad la'aanta ilmahaaga, qoomiya iyo isirka xubnaha qoyska, iyo aqoonsiga jinsiga ardayga, waxa aanu ilaalin doonaa sirta macluumaadka gaarka ah oo waxaanu u adeegsan doonaa kaliya wixii aqoonsiga qaabka ay wax u socdaan gobolkeena. Waxa aanu u adeegsan doonaa macluumaadka isaga oo la isku keeney, iyada oo aan lala xidhiidhin doonin waxba ardayga ama qoyska, si loosii wado hormarinta tilmaamaheena Dugsiyada Washington iyo hormarinta nidaamyadeena lagu taageerato xuquuqda ardayda iyo qoysaska.

OSPI ma wadaagto macluumaadka (sida, iimeelada iyo waraaqaha waxbarashada gaarka ah) ee la siiyo OSPI inta lagu jiro baadhitaanka SECC shakhsiyaad kale, hay'ado kale, ama hay'adaha kale ee federalka ama gobolka.

Xubnaha shacabku waxay dalban karaan inay helaan macluumaadka sida uu dhigayo Sharciga Shacabka gobolka Washington, laakiin hadii ay timaado dalabka noocan ah, waxaa jira dhawr shay oo "laga soo reebo". Marka si kale loo dhigo, waxaa jira dhawr nooc oo macluumaadka xubinta ah oo shacabka **ayna** geli karin. Waxaa ugu muhiimsan, macluumaadka soo socda **lama** siin doono OSPI iyada oo laga jawaabay dalabka duwaanka:

- Macluumaadka dheeraadka ah, iskii ama isaga oo la isku daray, waxaa lagu xidhay ama lagu xidhi karaa arday gaar ah taas oo u sahlaysa qofka si macquul ah bulshada dugsiga, kaas oo aan garanaynin xaalada la xidhiidha, aqoonsiga ardayga ee sababta sugnaan macquulka ah mustaqbalka. Tusaale ahaan, macluumaadka ku saabsan laxaad la'aanta ama qoomiyada iyo isirka ilmahaaga.
- Macluumaadka shakhsi ahaaneed ee xubinta qoyska ama koriyaha ee ardayga hadii macluumaadku uu keenayo bixin macluumaadka shakhsi ahaaneed ee ardayga.
- Macluumaadka xidhiidhka xaalada degdega ah ee xubnaha qoyska ama koriyayaasha.

Wixii macluumaad dheeraad ah ee dalabyada duwaanka shacabka, fadlan ka eeg khayraadkan:

- [Dalabka Duwaanada Shacabka OSPI](#)
- [Xeerka Ka Soo Reebida Duwaanka Shacabka OSPI](#)
- [Xafiiska WA ee Xeer Ilaaliyaha Guud: Helitaanka Duwaanka](#)

Qaybta IV: Eedeyn - Maxaad u aragtaa inuu khalad sameey dugsigu?

A. Bayaanka eedaynta xad gudubka:

Lagaagama baahna inaad ogaato sharciga lagu xad gudbay, laakiin waa in aad sharaxdaa waxa aad u aragto inuu dugsigu ku khalad yahay, sida: "Macalimiinta oo aan raacin IEP-ga ilmahayga." Fadlan ku lifaaq bogaga aad u baahan tahay si aad u hesho meel dheeraad ah oo aad ku qorto. Sidoo kale, fadlan sheeg: OSPI waxay kaliya baadhi kartaa eedeynta ku xad gudubka hadii ay dhacday sanadkii lasoo dhaafay gudihii oo kaliya.

Waxa aan u arkaa inuu dugsigu ku xad gudbay shuruudaha waxbarashada gaarka ah:

B. Macluumaadka ku saabsan eedeyntaada:

Fadlan waxa aad raacisaa taariikhaha muhiimka ah iyo faahfaahinta ku saabsan waxa dhacay.

C. Waraaqo noocee ah ayaad ku xoojinaysaa eedayntaada?

Waraaqo ka socda dugsiga, qiimaynta iyo IEP-ga ardayga, wargelimaha, iyo waraaqo kale ayaa kaa caawin kara inaad muujiso waxa dhacay iyo waxa aad u aragto inuu dugsigu ku khaldamay. Waxaa lagugu dhiiri gelinayaa inaad ku lifaaqo waraaqo la xidhiidha sida IEP-ga laakiin kuma aha waajib.

D. Maxaad jeclaan lahayn inay dhacaan?

Waxa aanu doonaynaa in aanu ogaano waxa aad dalbanayso in hadii OSPI ay ogaato in dugsigu ku xad gudbay xuduudka ardayda in lagu saxo. Tusaale ahaan, waxa aad dalban kartaa adeegyo IEP oo dheeraad ah ama kulan IEP.